


MAGAALADA CAMBRIDGE

Maxay yihiin Baaskiilada Korontada ku shaqeeya?



Baaskiilada Korontada ku shaqeeya waa baaskiilo ku rakiban matoor ku shaqeeya bateri.

Nooca 1* Matoorka wuxuu ku caawinayaa markaad lugaha ku badeeleyneyso baaskiilka, ilaa 20 mitir saacadii***

Nooca 2 Matoorka wuxuu ku caawinayaa markaad lugaha ku badeeleyneyso ama markaad isticmaaleyso qalabka gacanta, ilaa 20 mitir saacadii

Nooca 3 Matoorka ayaa ku caawinaya markii aad lugaha ku badeeleyneyso baaskiilka ilaa 28 mitir saacadii***

*Nooca = qaybta.

**Xawaaraha ayaa kordhi kara markaad ku wadeyso meel dagaandag ah.

***Sharciga Gobolka ayaa qeexaya Nooca 1 iyo Nooca 2. Nooca 3 laguma qeexin sharciga laakiin wali waa sharci in la isticmaalo.


Goormee La Icticmaali Karaa Baaskiilada Korontada ku Shaqeeya?



Aadista goobta shaqada ama iskuulka



Markaad banaanka kasoo adeeganeyso



Qaaditaanka rar culus iyo/ama caruur



Haddii baaskiil wadista ay kaa qaadato tamar badan



Markaad meel dheer aadeyso


Ikhtiyaarrada Baaskiilada Korontada ku shaqeeya.

Nooca baytari



- Laga saari karo ama ku rakiban
- Raadso mid buuxinaya xeerarka badqabka: UL 2849 ama EN 15194

Qaab-dhismeedka



- Mid aadan ka talaabsaneynin markaad koreysid ama mid aad ka talaabsaneysid birta dhexda ah si aad u korto

Geyrarka



- Kala hadal dukaanka baaskiilkaaga noocyada kala duwan

Nooca baaskiilka




- Mid La isku laabi karo—wey fududahay in la qaado meelna lagu xareeyo
- Baaskiilka xamuulka ee korontada ku shaqeeya—wuxuu qaadaa rakaab iyo/ama xamuul
- Baaskiilka dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama baaskiil gacanta ee korontada ku shaqeeya

Waa maxay sababta loo isticmaalo Baaskiilada Korontada ku Shaqeeya? Waa madadaalo!

...sidoo kale



Wadistooda waxay kor u qaadaa caafimaadka



Dhidid yar




Wey sahlantay in la dhex maro taraafikada



U wanaagsan-yahay deegaanka markii loo fiiriyo baabuurta



Wuu ka kharash yaryahay wadista gaariga



Shati loogama baahna markii Massachusetts la joogo

Talooyinka Badqabka Baaskiilka Korontada ku Shaqeeya

U wad si i la saadaalin karo



- Gadaashaada iska eeg ka hor inta aadan leexanin ama aadan bedelin leenka aad ku socotay
- Baaq bixi ka hor inta aadan leexanin
- Haku leex leexanin leemanka wadadda

• Xiro koofiyadda badbaadada

• Ahow mid muuqda (isticmaal nalalka iyo nalalka hummaag noqodka)



• Ku tababbarto meelaha dhaqdhaqaaqa gaadiidka uu ku yar yahay

• Si tartiib ah ugu wad meelaha mashquulka badan

• U joogso dadka lugeynaya

• Xawaaraha baaskiilka korontada ku shaqeeya ayaa noqon karaa mid la yaab leh

• Taxaddar oo ixtiraam dadka kale, gaar ahaan carruurta, waayeelka, iyo dadka naafada ah

• Darawallada ayaa laga yaabaa in aysan filaynin xawaaraha sare; aad u taxaddar, gaar ahaan markaad mareyso isgoysyada

Meel Dhigashada Baaskiilka Korontada ku Shaqeeya

• Meel sugan (garaash, qeybta dhulka hoose ee guriga, qolka keydka)*

Isticmaal quful fiican, kala hadal dukaanka baaskiilkaaga

• Batariga: ku kaydi meel nadiif ah oo qalalan, 32° ilaa 68° F

• Dabeynta: raac warqada tilmaamaha la socota baaskiilka

*Baaskiilada Korontada ku Shaqeeya aad ayey u weyn yihiin una culus yihiin in jaranjarooyinka lagu qaado, marka laga reebo noocyada la isku laabi karo.

Xagee la Oggolyahay in lagu wado Baaskiilada Korontada ku Shaqeeya?



• Waddooyinka iyo jidaska baaskiilka

• Inta badan waddooyinka baaskiilka iyo waddooyinka jaayga/shamiintada (hubi sharciyada deegaanka)

• Lama ogola in lagu wado waddooyinka lugta

• Laguma wadi karo waddooyinka aan laami ahayn ilaa calaamad ama boor ay ku qoran tahay waad ku wadi kartaa

Wixii macluumaad dheeri ah booqo

www.cambridgema.gov/Departments/communitydevelopment/cambridgebicycleaccessprograms

**CITY OF
CAMBRIDGE**

CDD
Community
Development